



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

**ANSIXINTA XUBNAHA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE
DOORASHOYINKA QARANKA**

Muqdisho, 6^{da} Luulyo 2015

GOLAHA SHACABKA:

Markuu Arkey: Qodobka 111 iyo 111G ee Dastuurka Federaalka;

Markuu Arkey: Qodobka 112 ee Dastuurka iyo Qodobka 7aad ee Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka;

Markuu Arkey: Soojeedinta R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Lam. XRW/000026/05/15 kuna taariikhsan 7/05/2015 oo Golaha soo gaartay 20/05/2015 kuna saabsan codsi Ansixinta xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka;

Markuu Arkey: Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee Golaha Shacabka ansixiyey 11^{kii} Febraayo 2015;

Markuu Ka baaraandegay: Taariikh nololeedka musharaxiinta loo soojeediyey in ay ka mid noqdaan Guddiga Madaxa-bannaan Doorashooyinka Qaranka;

Asaga oo ku kulansan: Kalfadhiga 6-aad Kulankiisa 19-aad ee 6^{da} Luulyo 2015 ay goobjoog yihiin 187 Xildhibaan wuxuu codeyn qarsoodi ah ku ansixiyey xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka oo magacyadooda iyo mid waliba tirada cod lagu ansaxiyey halkan hoose ku qoran:

<u>Magac</u>	<u>Oggol</u>	<u>Diiday</u>	<u>Aamustay</u>
1. M.ne Cabdiraxmaan Cusmaan Dirir	129	41	14
2. M.ne Maxamed Axmed Nuur	117	49	18
3. M.ne Maxamed Daahir Maxamuud	122	45	16
4. M.ne Maxamed Xasan Taani	120	48	16
5. M.ne Saciid Xaashi Warsame	124	42	17
6. M.ne Sayid Cali Sh. Maxamed	129	44	12
7. M.ne Xuseen Cabdi Aadan	114	55	14
8. Marwo Khadiijo Cosoble Cali	119	56	8
9. Marwo Xaliimo Ismaaciil Ibraahim	102	68	13

Waxaa Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga codsanayaa in uu go'aanka Golaha ku oggolaado Xeer Madaxweyne kuna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jumhuuriyadda Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo sida ku-meel-gaarka loo ansixiyey iyo Qodobka 27aad ee Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

